



## Gabdhaha kubadda cagta ee Cleveland oo si adag hoggaanka u haya sida ka muuqata PIL marka la eego kooxaha-gobolka oo dhan ‘all-state’ ee dhanka tacliinta.

Sanadkii labaad ee isku xigta, Dugsiga Sare ee Cleveland wuxuu soo saaray kooxda kubadda cagta gabdhaha ee dhanka tacliinta ee ugu sareysa gobolka Kooxda Warriors ayaa keenay qiyaasta ugu sareysa ee heerka dhibcaha la isku daray iyada oo aanay kaliya ahayn kooxaha Class 6A, balse ay tahay kooxaha kubadda cagta ee dhammaan heerarka kala duwan ee Oregon ee [Abaalmarinada Tacliimeed ee Gobolka oo Dhan ee OnPoint Community Credit Union](#).

Qiyaasta Dhibcaha ee Ciyaaraha oo dhan 3.90 GPA ee Cleveland ay keentay ayaa waxoogaa ka horreeyay kooxda Naadiga Dugsiyada Ka Dhixeyya ee Portland, Wilson oo kaalinta 2 ka gashay Class 6A iyo dhammaan heerarka kala duwan labadoodaba. Sanadkii la soo dhaafay, [Cleveland waxay gashay kaalinta 1](#) marka la eego dhammaan kooxaha kubadda cagta ee gabdhaha ee ka jira gobolka iyada oo keentay qiyaasta dhibcaha ee ciyaaraha oo dhan 3.94 GPA.

Sharafta dhanka tacliinta ahi waxay u soo hoyatay koox sidoo kale sanadka guul ka gaartay dhanka garoonka ciyaaraha. Kooxda Warriors waxay gashay kaalinta koowaad ee PIL sanadkii labaad ee isku xigta, iyaga oo isku kaalin la galay Lincoln kaasi oo la xiriirta horyaalka kooxaha iyaga oo keenay rikoor dhan 4-0-2.

Kooxda Warriors waxay qayb ka ahayd wax muujin adag oo ay muujiyeen PIL, taasi oo 20 kooxood ka dhigtay in ay ka tirsanaadaan kooxaha-gobolka oo dhan ee dhanka tacliinta, taasi oo ah abaalmarin loogu talagalay galida 10 kaalmood ee ugu sarreyya ee loogu talagalay GPA ee heerka kala duwan. Saddex kooxood oo kale oo ka tirsan PIL ayaa galay kaalinta 1 ee Class 6A ee ciyaarahooda: Kubadda laliska ee Wilson (3.84 GPA), Kubadda cagta ee wiilasha ee Wilson (3.65 GPA) iyo Orodka dheer ee wiilasha ee Franklin (3.94 GPA).

Halkan waxaa ku qoran kooxaha PIL ee helay sharafta gobolka oo dhan ‘all-state’ (Class 6A iyada oo wax kale la tilmaamo maahane):

### **Kubadda cagta ee gabdhaha**

1. Cleveland, 3.90
2. Wilson, 3.89

**Kubadda cagta ee wiilasha**

1. Wilson, 3.65
2. Franklin, 3.64
5. Lincoln, 3.56
7. Cleveland, 3.54
8. Grant, 3.50

**Kubadda laliska**

1. Wilson, 3.84
3. Grant, 3.82
- t4. Lincoln, 3.77
- t10. Cleveland, 3.70

**Orodka dheer ee wiilasha**

1. Franklin, 3.94
4. Cleveland, 3.90
9. Lincoln, 3.79

**Orodka dheer ee gabdhaha**

- t6. Franklin, 3.94
- t6. Grant, 3.94
10. Cleveland, 3.90

**Kubadda cagta Maraykanka, Class 6A**

5. Lincoln, 3.32
9. Grant, 3.22

**Kubadda cagta Maraykanka, Class 5A**

2. Wilson, 3.22